

Qoraalka Aqoonsiga Qallalka iyo ka Jawaabidda



NOOCA QALLALKA	SIDUU U EG YAHAY	WAXA UUSAN AHAYN	WAXAAD SAMEEYNEEYSO	WAXA AADAN SAMEEYNEEYN
Qallalka Baahsan ee Tonic Clonic (oo sidoo kale loo yaqaan Grand Mal/Qallal weyne)	Qaylo kadiso ah, dhicid, qallafsanaan, oo ay daba joogaan murqaha oo boodaya, neef qaadasho meel soke ah, jirka oo midab buluug ah yeesha, laga yaabo inay kaadida ama saxaro ka fakato, wuxuu inta badan socdaa dhowr daqiiqadood. Markaas ka dib neefsiga caadiga ah ayaa dib u bilowda. Waxaa laga yaabaa inay jirto dawakhaad iyo/ama daal xad dhaaf ah, oo ay ku xigto miyirka oo toos u soo noqda.	Wadne joogsi Faalig/Dhiig furanka maskaxda	Raadi aqoonsiga caafimaadka. Ka ilaali khataraha u dhow. Ka dabci garabaatiga ama kulleetiga shaarka. Ka ilaali jug madaxa ka gaadha. Dhinac u rog si ay neeftu toos ugu socoto haddii uusan dhaawac gaadhin. Niyadda u qabooji goorta uu miyirku soo noqonayo. Haddii halka qallal uu ka yaraa 5 daqiiqo, warso inuu u baahan yahay baadhitaan dhakhtar. Haddii dhowr qallal ay tahay, ama mid ka badan yahay 5 daqiiqo u yeer ambalaas. Haddii qoftu uur leedahay, dhaawac jiro ama macaan uu qabo isla markiiba gargaar dalbo.	Shay adag ha galin afka. Ha isku dayin inaad carrabka qabato. Ha isku dayin inaad cabitaan siiso inta qallalku jiro ama qaddarka yar ee ku xigta markuu dhammaado. Ha adeegsan aalad lagu neefsado inaad neef ka weydo markii murquhu dhufashada joojiyaan mooyaane, ama haddii biyo ay u galeen. Xoog ha u celin.
Maqnaansho (oo sidoo kale loo yaqaano Petit Mal/Qalal yare)	Meel cidlo ah oo la eegayo, oo kadis u bilowda kuna dhammaada ilbiriqso kooban, oo ku badan carruurta. Waxaa laga yaabaa inay la socoto indhaha oo dhaqso looga bigbigsiiyo, iyo dhaqdhaqaaq afka oo calalis ah. Ilmaha ama qofka weyn ma oga waxa dhacaya inta qallalku socdo, laakiin wuxuu durbaba ku soo laabta miyir buuxa markii uu joogsado. Waxaa ka iman kara waxbarashada oo nuqsan ku timaado haddii inta la garto aan la daweyn.	Fakar/islashееkeeysi Feejignaan la'aan Si kas ah in looga dhaga adeeygo amarka dadka waaweyn	Wax gargaar degdeg ah uma baahna, laakiin haddii ay tahay markii ugu horreysay oo lagu arko qallalka waa in lagula taliyaa baadhitaan caafimaad.	
Qallal Goob Kooban	Dhufashada ayaa ka bilaaban karta hal qeyb oo jirka ah sida gacan, lug ama wajiga. Dhufashada lama joojin karo laakiin bukaanku wuu soo jeedaa oo miyir qabaa. Dhufashada ayaa ka faafi karta hal qeyb oo jirka ah illaa ku kale marmarna way faaftaa oo noqotaa qallal gariiriso leh. Qallalka qeyb ka mid ah dareemayaasha waxaa laga yaabaa inuusan qofka la jooga garan. Bukaanku wuxuu dareemayaa jawi gaddisan. Waxaa laga yaaba inuu arko ama maqlo wax aan meesha oolin, waxaa laga yaabaa inuu dareemo cabsi aan sabab lahayn, xanaaq ama farxad. Waxaa laga yaabaa inuu dareemo laqanyo, u uraan wax la yaab leh, ama ay calooshu si la yaab leh u "qasanto".	Edeb darro Dhaqan yaab leh Dareen aan la xukumi karin Cudurka dhimirka Cudurrada maskaxda oo jirkaba wada socda Dareen maanka ka weyn ama mucjiso ah	Ka jawaabid ama gargaar degdeg ah uma baahna haddii uusan qallalku noqon mid gariiriso leh, markaas waa in sida kor ku xusan gargaarka degdegga ah loo fuliyo. Wax falcelin ah oo degdeg ah looma baahna oo aan ahayn sasabaad iyo niyad u qaboojin. Waa in lagula taliyaa baadhitaan caafimaad.	
Qallal Goob Xiriirsan (oo sidoo kale loo yaqaan Psychomotor ama Temporal Lobe)	Wuxuu inta badan ka bilowdaa qofka oo meel cidlo ah eegaya, oo ay ku xigto calalin, iyo markaas falal aan isku aaddaneeyn. Qofku wuxuu u muuqda inuusan hareerhiisa ka warqabin, waxaana laga yaabaa inuu wareersan yahay oo ganuunacayo. Ficiil aan xakamo lahayn, qaabdarro ah, aan jiho lahayn. Waxaa laga yaabaa inuu dharka jiidjiido, wax iska soo aruursado, waxaana laga yaabaa inuu isku dayo inuu dharka siibo. Waxaa surogal ah inuu cararo, baqdin ka muuqato, inuu fak-fakado, ama diido xakameeynta. Mar haddii hal nidaam uu qabsado, isla falalkii ayaa la socda qallal kasta. Dhowr daqiiqo ayuu socdaa, laakiin jaha-wareerka xiga qallalka ayaa muddo aad u dheer socon kara. Ma jiraan wax xasuus ah oo ku aaddan wixii dhacay inta qallalku socday.	Sakhrad Maandooriye lagu sakhraamo Cudurrada dhimirka Dhaqan xumo	Si deggan u hadal si aad niyadda ugu dajiso bukaanka iyo dadka kaleba. Si tartiib ah uga kaxee wixii halis muuqda. La jog qofka illaa uu si buuxda ula socon karo jawiga.	Intaad qabato ha celin haddii aysan halis degdeg ah jirin (sida qarka afkiisa ama gaadhi ku soo socda oo waxyeelleyn kara) Ha isku dayin inaad celiso Ha qeylin Ha filin in amarka lagu dhawaaqo uu qaato
Qallalka Atonic (oo sidoo kale loo yaqaan Dhicid Kadiso ah)	Cunug ama qof weyn oo si kadis ah u dhaca. Muddo 10 ilbiriqsi ama daqiiqad gudaheed ayuu ku kabsan, wuu soo naaxayaa, wuuna istaagi karaa oo socon karaa.	Qaab-darro "Heer" carrurnimo oo caadi ah Ilmaha oo si wanaagsan aan u socon karin Qofka weyn oo sakhraansan Xanuun badan	Ka jawaabid/gargaar degdeg ah uma baahna (haddii uusan dhaawacmin markuu dhaco), laakiin ilmaha yar waa in baadhitaan caafimaad oo qoto dheer lagu sameeyaa.	
Qallalka Myolonic	Dhufashada murqaha oo kadis ah aadna u xooggan oo laga yaabo inuu jirka oo dhan ama qeybo ka mid ah yahay. Waxaa qofka ka daadan kara waxa uu gacanta ku hayo ama kursiga ayuu ka dhici karaa.	Qaab-darro Isku toosnaan la'aan	Ka jawaabid/gargaar degdeg ah uma baahna, laakiin waa in baadhitaan caafimaad oo qoto dheer lagu sameeyaa.	
Qallalka Dhallaanka	Waa dhaqdhaqaaq kadis ah oo si degdeg ah isku raacsan oo billowda inta u dhexeeya da'da 3 bilood iyo labo sano. Haddii ilmuhu fadhiyo madaxa ayaa hore u soo dhacaya gacmahana hore ayay u taagmayaan. Haddii ilmuhu jiifo, dhawaaq ayaa kor uga soo baxaya iyadoo ay gacmaha iyo madaxa hore u soo jiidmayaan sidii inuu ilmuhu wax uu cuskado laacayo.	Dhaqdhaqaaqa caadiga ah ee ilmaha yar Calool majiir	Ka jawaabid/gargaar degdeg ah uma baahna, laakiin waa in dhakhtar lala tashado.	



**Qoraalka Aqoonsiga Qallalka
iyo ka Jawaabidda**